schools
a tyler portfolio

LICKING HEIGHTS
LOCAL SCHOOLS

# My Ride K-12 | Hagaha Isticmaalka Waalidka

## Sida loo isticmaalo bogga internetka My Ride K-12

1. Adigoo isticmaalaayo browser-ka Chrome, waxaad tagtaa bogga **myridek12.tylerapp.com.**
2. Haddii aad hore u diiwan gelinin iimaylkaada, riix qaybta **Sign up (Diiwan Geli)**.
3. Sifo aad isu diiwan geliso, qor cinwaankaada iimaylka, furo sir kuu ah, iyo magac.
4. Markaad isdiiwan geliso ka dib, waxaad heli doontaa iimayl xaqiijineed. Riix link-iga iimaylkaada sifo aad u xaqiijiso diiwan gelinta aad ka samaysay bogga My Ride K-12.
5. Markii lagaa codsado, raadi magaca degmada dugsiga uu cunugaada ka wax barto. Haddaa caawinaad u baahato, fadlan la xiriir degmadaada dugsi.
6. Waxaad ka dib qortaa xogta gaarka ah ay u baahan tahay degmada sifo ay u aqoonsato ardayga. Ku celi talaabadan sifo aad ugu darto arday dheeraad. Hadda caawinaad u baahato, fadlan la xiriir degmadaada dugsi.
7. Markaad hesho ardayga, riix xogta ardayga sifo aad u eegto dhammaan maclumaadka khuseeyo ee gaadiid.




Login Screen




My Ride K-12 Dashboard




Find Your Student

8. Sifo aad ula qaybsato link-iga ardayga qof kale, dooro ardayga ka dib na riix qaybta **Share** (**Faafi**).
9. Qor iimaylka shakhsiga aad dooneyso inaad la qaybsato. Qofkaasi wuxuu heli doonaa iimayl xaqiijineed oo si toos ah ugu xiriirin doonto ardayga(ardayda) lala qaybsaday. Dadka helaayo farrinta waa qasab inay iska diiwan geliyaan My Ride K-12, hadday hore u samaynin taasi, sifo ay u helaan maclumaadka ardayga.

*...waxaa lagusii waday qaybta dambe*

*© 2024 Tyler Technologies, Inc., All rights reserved.*

ST-MR-PUG-FLY-32810-0124

tyler
technologies

## Sida loo isticmaalo app-ka telefoonka My Ride K-12

1. Kasoo deji app-ka **My Ride K-12** Google Play Store mise Apple App Store.
2. Ka dib markaad dejiso app-ka, fur My Ride K-12.
3. Markii lagaa codsado inaad raadiso degmadaada dugsi, raadi magaca degmada dugsiga uu cunugaada ka wax barto. Haddaa caawinaad u baahato.
4. Markaad doorato degmadaada, waxaad hore ugu gudbi doontaa bogga galitaanka. Haddaad lahayn iimayl aad hore u diiwan gelisay, riix **Diiwan Geli**.
5. Sifo aad isu diiwan geliso, qor cinwaankaada iimaylka, furo sir kuu ah, iyo magac.
6. Markaad isdiiwan geliso ka dib, waxaad heli doontaa iimayl xaqiijineed. Riix link-iga iimaylkaada sifo aad u xaqiijiso diiwan gelinta aad ka samaysay bogga My Ride K-12.
7. Bogga gal, ka raadi ardayga adigoo tagayo qaybta My Students (Ardadayda) ka dib na dooro qaybta **+**. Tani ayaa kuu gudbin doonto shaashadda **Add Student** (**Ku Dar Arday**).
8. Waxaad qortaa xogta gaarka ah ay u baahan tahay degmada sifo ay u aqoonsato ardayga. Ku celi talaabadan sifo aad ugu darto arday dheeraad. Hadda caawinaad u baahato, fadlan la xiriir degmadaada dugsi.
9. Markaad hesho ardayga, riix xogta ardayga sifo aad u eegto dhammaan maclumaadka khuseeyo ee gaadiid.
10. Ku dhufo qaybta **Share** (**Faafi**) sifo aad ula qaybsato link-iga ardayga qof kale.
11. Qor iimaylka shakhsiga aad dooneyso inaad la qaybsato. Qofkaasi wuxuu heli doonaa iimayl xaqiijineed oo si toos ah ugu xiriirin doonto ardayga(ardayda) lala qaybsaday. Dadka helaayo farrinta waa qasab inay iska diiwan geliyaan My Ride K-12, hadday hore u samaynin taasi, sifo ay u helaan maclumaadka ardayga.
12. Had iyo jeer eeg war cusub inuu jiro sifo aad u xaqiijiso inuu telefoonkaada isticmaalaayo nooca ugu dambeeyey ee app-ka.
13. Haka bixin app-ka sifo aad usii hesho ogeysiinta degmada, xitaa markaad toos u furaynin mar walba app-ka.



Find Your District



App Login Screen

Sifo aad u hesho maclumaad dheeraad mise caawin arrin hadda socoto sida xogta magaca iyo furaha sirta, su'aalaha goobaha boostaahada, mise baahiyo kale fadlan

**La xiriir waaxda gaadiidka degmadaada.**



© 2024 Tyler Technologies, Inc. All rights reserved